JAAMACADDA GÖTEBORG
KULLIYADDA AFAFKA IYO SUUGAANTA
P.O.B. 200 • 405 30 GÖTEBORG • ISWIIDHAN

AASAASKA NAXWAHA

AF SOOMAALIGA

BUUGGA LAYLIYADA

Morgan Nilsson

Uppdaterad
18 oktober 2021
Gäller höstterminen 2021

Detta är ett pågående arbete.
Därför kan vissa uppgifter vara ofullständiga.
Läs alltså kritiskt! Kontakta mig gärna med ev. synpunkter.

morgan.nilsson@gu.se

1. Xubnaha Weerta

Raadi qaybaha weerta / xubnaha weerta.

Had iyo jeer ka bilow QURUBWEEREEDKA.

Dabadeed raadi KHABARKA iyo YEELAHA.

1. Waa ay tageen.

2. Iyadu waa ay huruddaa.

3. Ardaydu waa ay dheelayaan.

4. Sahra waa ay heesaysaa.

5. Cigaal waa uu baqay.

6. Waa aan gajoonayaa.

subjekt + satspartikel + predikat + objekt

yeele + qurubweereed + khabar + layeele

7. Bareesadu waxa ay leedahay dab.

8. Faarax waxa uu qodayaa beerta.

9. Hodan waxa ay rabbayneysaa shinnida.

10. Isagu waa uu ilaashadaa hantidiisa.

11. Reerguuraagu waxa uu leeyahay xoolo.

12. Waxa ay shiilaysaa kalluun.

subjekt + satspartikel + predikat + adverbial

yeele + qurubweereed + khabar + falkaab

13. Maryan waxa ay ku ciyaaraysaa qorikabriid.

14. Daaqadaha waxa ku jira muraayado.

15. Waxa uu la joogaa ari.

16. Waxa ay ku ordaysaa guriga.

17. Waxa uu ka shaqaynayaa dukaankiisa.

18. Waxa ay u socdaan dugsiga.

subjekt + satspartikel + predikat + objekt + adverbial

yeele + qurubweereed + khabar + layeele + falkaab

19. Hooyadu waxa ay qashinka ku ridaysaa god.

20. Dabka waxa aan ku karsannaa cuntada.

21. Awrtu waxa ay qoyska u qaaddaa aqalka.

22. Hurdada waxa aynnu ka helnaa caafimaad.

23. Albaabka waxa laga sameeyay loox.

24. Geedaha waxa aynnu ka helnaa dawo.

Satsdelar med flera ord

subjekt + satspartikel + predikat + objekt + adverbial

yeele + qurubweereed + khabar + layeele + falkaab

25. Geeddi qoyskoodu waxa uu leeyahay xoolo.

26. Shinnida waa la dhaqan karaa.

27. Axmed waxa uu ku ciyaarayaa middi, xarig koronto iyo masaamiir.

28. Biyaha waxa aynnu ka soo dhaansannaa ilaha biyaha.

29. Dabku waxa uu gubi karaa iyada.

30. Dhammaan lacagtiisa waa uu bixiyey.

subjekt + satspartikel + predikat

yeele + qurubweereed + khabar

31. Waa ay seexdeen.

32. Waa aan duqoobey.

33. Waa aad kortay.

34. Waa aynu soconnaa.

35. Xasan waa uu ooyayaa.

36. Nuur waa uu cararay.

subjekt + satspartikel + predikat + objekt

yeele + qurubweereed + khabar + layeele

37. Waxa uu leeyahay ari.

38. Waxa ay tolaysaa haan.

39. Waxa uu leeyahay gaaridameer.

40. Waxa uu qoysku leeyahay dukaan.

41. Waxa uu waraabinayaa geel.

42. Xabiiba waxa ay lisaysaa sac.

43. Waxa uu qodayaa beertiisa.

44. Biyaha waa la cabbaa.

45. Dugsigii waa la furay.

46. Hawada waa aynu neefsannaa.

52. Xisbigiina waa la xiray.

subjekt + satspartikel + predikat + adverbial

yeele + qurubweereed + khabar + falkaab

47. Waxa uu ku yaallaa magaalo.

subjekt + satspartikel + predikat + objekt + adverbial

yeele + qurubweereed + khabar + layeele + falkaab

48. Gurigu waxa uu dadka ka celiyaa qorraxda.

49. Kalluunka waxaa lagu qallajinayaa qorraxda.

50. Saqafka waxa laga sameeyey terniig.

51. Waxa ay cuntada ku karsadaan dhuxul.

Satsdelar med flera ord

subjekt + satspartikel + predikat + objekt + adverbial

yeele + qurubweereed + khabar + layeele + falkaab

53. Dadka qaar kale waxa ay cuntada ku karsadaan xaabo.

54. Dadku waxa ay geedaha qaar ka helaan cunto.

55. Dibedda gurigan waxaa jooga waraabayaal.

56. Dugsiga waxa aynnu ku soo barannaa akhriska iyo qorista.

57. Gidaarrada gurigan waxa lagu dhisay dhagax iyo shamiinto.

58. Gurigu waxa uu dadka ka celiyaa dugaagga halista ah.

2. Jaadadka Erayada

Bestäm vilken ordklass varje ord tillhör

waa, ay, tageen, Iyadu, huruddaa, ardaydu, dheelayaan, Sahra, heesaysaa, Cigaal, baqay, waa, aan, gajoonayaa, bareesadu, waxa, ay, leedahay, dab, Faarax, uu, qodayaa, beerta, Hodan, rabbayneysaa, shinnida, Isagu, ilaashadaa, hantidiisa, Reerguuraagu, leeyahay, xoolo, shiilaysaa, kalluun, Maryan, ku, ciyaaraysaa, qorikabriid, daaqadaha, ku, jira, muraayado, waxa, uu, la, joogaa, ari, ordaysaa, guriga, u, socdaan, dugsiga, Geeddi, qoyskoodu, shinnida, waa, la, dhaqan, karaa, ilaha, biyaha, waa, aan, duqoobey, dugsigii, waa, la, furay, kalluunka, waxaa, lagu, qallajinayaa, qorraxda, saqafka, waxa, laga, sameeyey, terniig, dadka, qaar, kale, Dibedda, gurigan, waxaa, jooga, waraabayaal, dugsiga, waxa, aynnu, ku, barannaa, akhriska

3. Xubnaha Weerta iyo Jaadadka Erayada

Markera både satsdelar och ordklasser i följande meningar.

Stora bokstäver eller färger för satsdelarna:

subjekt	satspartikel	predikat	objekt	adverbial
yeele	qurubweereed	khabar	layeele	falkaab
Y	Q	Kh	L	Fk

Små bokstäver för ordklasserna:

m = magac, **q** = qurub, **f** = fal, **my** = magacuyaal, **h** = horyaale, **s** = sifo

1. Daanyeerkii waa uu qoslay.

2. Hodan waxa ay caawinaysaa aabbaheed.

3. Reer-guuraagu waxa uu dhaqdaa xoolo.

4. Waa uu ilaashadaa hantidiisa.

5. Waxa uu waraabinayaa geed yar.

6. Cali waxa uu ku ciyaarayaa bareesada.

7. Waxa uu ka shaqeeyaa dukaanka.

8. Derbiga waxa lagu dhisay laamo.

9. Biyaha waxa aynnu u adeegsannaa siyaabo kala duwan.

10. Dharkeeda waxa qabsan kara dab.

11. Guryaha magaaladu waxa ay leeyihiin qolal kala duwan.

12. Hodan aabbaheed waxa uu leeyahay geedo.

13. Ilmuhu waxa uu ku socdaa xagga birjikada.

14. Waxa ay guriga saaraan raro, kebed iyo jarco.

15. Korantadu waxa ay dhalin kartaa halis.

16. Marka hore dumarku waxa ay dhisaan dhigaha iyo udbaha.

17. Maxamed waxa uu ku dhashay magaalada Marka.

18. Shebaagta waxa uu ku soo dabtaa kalluun.

19. Ugaxdoodana waa la cunaa.

20. Waraabayaashu waa ay weerari karaan carruurta.

21. Waxa ay kalluun ku iibinaysaa suuqa dhexdiisa.

22. Waxa aynu guryaha ku cunnaa cunto kala duwan.

23. Waxa aynu leenahay baahiyo kala duwan.

24. Waxa uu aabbihii u tolayaa shebekad kalluun.

25. Waxa uu gaaridameerka ku qaadaa jawaannada culus.

26. Waxa uu kalluun ku soo dabanayaa huurigiisa.

27. Waxa uu ku nasanayaa barandaha gurigiisa.

28. Xaawa, Geeddi, Aamina iyo Axmed dhammaantood waxa ay caawinayaan qoysaskooda.

29. Xoolaha waxa aynu ka helnaa walxo badan.

30. Xooluhu waxa ay ka helaan cunto geedaha iyo dhirta.

4. Xubnaha Weerta

Hitta satsdelarna.

Subjekt	Y	Yeele
Satspartikel	Q	Qurub-weereed
Predikat	Kh	Khabar
Objekt	L	Layeele
Adverbial	Fk	Falkaab

1. Waxa ay toshaa dharka.

2. Jaamac waxa uu ka shaqeeyaa dukaanka.

3. Xabiiba waxa ay lisaysaa sac.

4. Dahabo waxa ay beerteeda ku beertay baradho, gallay iyo digir.

5. Caasha waxa ay tolaysaa haan.

6. Geeddi waxa uu la joogaa ari.

7. Toddobaad kasta dugsigu waxa uu isticmaalaa 13 jawaan oo baradho ah.

8. Reer-guuraagu waxa uu dhaqdaa xoolo.

9. Xoolaha ayaa ay kolba meel ula guuraan.

10. Cismaan waxa uu waraabinayaa geed yar.

11. Xaawa waxa ay haruur siinaysaa digaagga.

12. Ka dibna waxa ay tegeysaa dugsiga.

13. Cabdi waxa uu haystay 83 250 shilin.

14. Aabbe ayaa 264 sac u qaybiyey wiilashiisa.

15. Xisaabaadka bangiga Faaduma waxa ku jiray 56750 shillin.

16. Maalin Sabti ah ayaa markab laga rogay 23 000 jawaan.

17. Xaliimo waxa ay iibisay 13 450 muus bisha Noofembar.

18. Cumar waxa uu 25 650 oo shilin ku soo iibsaday shaadh.

19. Wershad kalluun ayaa dhoofisay 24 369 qasaacadood sannadkii 1998.

20. Qoyska ayaa ay Bilan cunto u karinaysaa.

5. Jaadadka erayada

Avgör **ordklassen** för varje ord.

Substantiv	M	Magac
Pronomen	Muy	Magacuyaal
Verb	F	Fal
Partikel	Q	Qurub
Preposition	H	Horyaale (Meeleeye)
Adjektiv	S	Sifo (Tilmaame)
Konjunktion	X	Xiriiriye, Xidhiidhiye
Interjektion	Yb	Yaab

1. Waxa ay toshaa dharka.

2. Jaamac waxa uu ka shaqeeyaa dukaanka.

3. Xabiiba waxa ay lisaysaa sac.

4. Dahabo waxa ay beerteeda ku beertay baradho, gallay iyo digir.

5. Caasha waxa ay tolaysaa haan.

6. Geeddi waxa uu la joogaa ari.

7. Toddobaad kasta dugsigu waxa uu isticmaalaa saddex jawaan oo baradho ah.

8. Reer-guuraagu waxa uu dhaqdaa xoolo.

9. Xoolaha ayaa ay kolba meel ula guuraan.

10. Cismaan waxa uu waraabinayaa geed yar.

11. Xaawa waxa ay haruur siinaysaa digaagga.

12. Ka dibna waxa ay tegeysaa dugsiga.

13. Cabdi waxa uu haystay kun shilin.

14. Aabbe ayaa afar sac u qaybiyey wiilashiisa.

15. Xisaabaadka bangiga Faaduma waxa ku jiray kun shillin.

16. Maalin Sabti ah ayaa markab laga rogay boqol jawaan.

17. Xaliimo waxa ay iibisay shan muus bishii Noofembar.

18. Cumar waxa uu kun shilin ku soo iibsaday shaadh.

19. Wershad kalluun ayaa dhoofisay labaatan kun oo qasaacadood sannadkii laba kun iyo siddeed iyo tobankii.

20. Qoyska ayaa ay Bilan cunto u karinaysaa.

6. Qurubweereedyada iyo diiradeynta

Raadi qaybaha weerta.

Had iyo jeer ka bilow QURUBKA.

Dabadeed raadi KHABARKA iyo YEELAHA.

Ugu dambayntii raadi LAYEELAHA iyo FALKAABKA.

Vilken funktion har satspartikeln?

1. Ma arki kartaa shebaagta?

2. Nayshu waa ay ordaysay.

3. Qoyska ayaa ay cunto u karinaysaa.

4. Reer-guuraagu ma laha dukaanno.

5. Waxa ay toshaa dharka.

6. Eeg sawirradan.

7. Xarigga ha taaban.

8. Roob baa shalay da'ay.

9. Dabadeedna ha sawiraan.

10. Dabka waa aynnu kulaallaa.

11. Qoyskiinnu ma leeyahay meherad?

12. Geedaha waa aynnu harsannaa.

13. Waxa ay haruur siinaysaa digaagga.

7. Erayweydiimeedyada iyo diiradeynta

Raadi qaybaha weerta.

Had iyo jeer ka bilow QURUBKA.

Dabadeed raadi KHABARKA iyo YEELAHA.

Ugu dambayntii raadi LAYEELAHA iyo FALKAABKA.

Svara först på frågan och hitta satsdelarna i svaret.

1. Maxaa uu ku iibiyaa dukaanka?

2. Sidee baa aad gurigiinna u nadiifisaa?

3. Yaa iyaga wax u dhigaya?

4. Goorma ayaa aad seexataa?

5. Xaggee baa aynnu biyaha ka helnaa?

6. Halkee baa aad biyaha ku kaydsataan?

7. Maxaa ay dadku beerta ka qabtaan?

8. Sidee baa aynnu u qurxinnaa guryaha?

9. Maxaa ay raggu samaynayaan?

10. Adiga yaa ku ilaaliya?

11. Ilmuhu maxaa uu samaynayaa?

8. Qurubweereedyada (naqtiin)

Raadi qaybaha weerta.

Had iyo jeer ka bilow QURUBKA.

Dabadeed raadi KHABARKA iyo YEELAHA.

Ugu dambayntii raadi LAYEELAHA iyo FALKAABKA.

Khabarka ma ku jiraa horyaale?

4. Isaga ayaa leh beerta.

5. Ma arki kartaa doonnida aabbaheed?

6. Ma laha beero.

8. Adigu ma nadiifisaa gurigiinna?

9. Daaqaddu ma laha muraayad.

10. Dharku waa uu ina asturaa.

11. Eeg sawirka sare.

1. Sawir gurigiinna.

2. U baxa dibedda.

12. Adigu ma ilaalisaa walaalahaaga yaryar?

13. Halkee baad ku riddaa qashinka?

14. Halkee baad seexataa?

15. Maxaa aad ku arki kartaa sawirka?

16. Maxaa aan dabka u adeegsannaa?

17. Ciyaarahee baa aad adigu ciyaartaa?

7. Maxaa ay haweenku samaynayaan?

3. Yaad la ciyaartaa?

18. Axmed waa uu isku goyn karaa middida.

19. Badda ayaa uu kalluun ka soo dabanayaa.

20. Ciyaartu waxa ay ina gelisaa farxad.

20b. Wiilku waxa uu jeebka geliyaa lacag.

20c. Wiilku waxa uu ina siiyey lacag.

21. Cuntadu waxa ay jidhkeenna gelisaa caafimaad.

22. Cuntadu xoog bay inoo yeeshaa.

23. Dad tiro yar baa wax ku karsada makiinadda korontada.

24. Dadka qaar baa cuntada ku karsada madbakha.

25. Dadka qaar kale dibedda ayaa ay cuntada birjiko ku karsadaan.

26. Dhar kala duwan baa aynnu xirannaa xilliyada kala duwan.

27. Gaaridameerkiisii waxa uu kaga shaqeeyaa magaalada.

28. Goorma ayaa aad nadiifisaa gurigiinna?

29. Guryaha reer guuraaga si fudud baa loo dhisi karaa.

30. Hooyadu qashin ayey ku guraysaa teneg.

31. Intee walxood baa laga helaa gurigiinna?

32. Ha dhex gelin bareesada qalin-qori ama xarig.

33. Maxaa ay dadku u dhaqdaan xoolahan?

9. Qaybaha Weerta (naqtiin)

Raadi

Subjekt	Yeele	(Y)
Predikat	Khabar	(Kh)
Satspartikel	Qurub weereed	(Q)
Objekt	Layeele	(L)

1. Waxa ay tolaysaa haan.
2. Geeddi waxa uu waraabinayaa geela.
3. Maryan waxa ay toshaa dharka.
4. Faarax waxa uu qodayaa beerta.
5. Xabiiba waxa ay lisaysaa sac.
6. Saynab waxa ay shiilaysaa kalluun.
7. Dabadeed waxa ay tagtaa dugsiga.
8. Eeg sawirkan.

10. Prepositioner i predikatet

Hitta
Subjekt/Yeele (Y),
Predikat/Khabar (Kh),
Satspartikel/Qurub weereed (Q),
Objekt/Layeele (L) och
Adverbial/Falkaab (F).

1. Qoyska ayaa ay cunto u karinaysaa.

2. Fiiri sawirka.
3. Waxa uu la joogaa adhi.
4. Saqafka waxa laga sameeyay jiingado.
6. Waxa uu ka shaqeeyaa dukaanka.
7. Daaqadaha waxa ku jira muraayado.
10. Dadkani waxa ay ku karsadaan cuntada shoolad.
11. Waxa uu ku yaallaa magaalo.
12. Albaabka waxa lagu sameeyey loox.
14. Saqafka waxa lagu daboolay caws.
15. Hooyadu waxa ay xashiishka ku ridaysaa god.
16. Waxa ay ku ordeysaa guriga.
17. Gurigu waxa uu dadka ka celiyaa roobka.
18. Waxa uu ku nasanayaa barandaha.
19. Saynab waxa ay ku ciyaaraysaa qori-kabriid.
20. Cumar waxa uu ku ciyaarayaa mindi.
21. Cuntada waxa aynu ka helnaa tamar.
22. Cuntadu waxa ay jidhkeenna gelisaa caafimaad.
23. Hurdada waxa aynnu ka helnaa caafimaad.

11. Ordklasser

Avgör ordklass för varje ord:
substantiv/magac (m),
partikel/qurub (q),

pronomen/ magacuyaal (my),
verb/fal (f)
preposition/horyaale (h).

1. Waxa ay tolaysaa haan.
2. Geeddi waxa uu waraabinayaa geela.
3. Maryan waxa ay toshaa dharka.
6. Faarax waxa uu qodayaa beerta.
7. Xabiiba waxa ay lisaysaa sac.
8. Saynab waxa ay shiilaysaa kalluun.
9. Dabadeed waxa ay tagtaa dugsiga.
10. Eeg sawirkan.
11. Qoyska ayaa ay cunto u karinaysaa.
12. Fiiri sawirka.
13. Waxa uu la joogaa adhi.
14. Saqafka waxa laga sameeyay jiingado.
15. Maxaa ay dadku u dhaqdaan xoolahan?
16. Waxa uu ka shaqeeyaa dukaanka.
17. Daaqadaha waxa ku jira muraayado.
18. Halkee baa aad ku riddaa xashiishka?
19. Maxaa aynnu u caawinnaa qoyskeenna?
20. Dadkani waxa ay ku karsadaan cuntada shoolad.
21. Waxa uu ku yaallaa magaalo.
22. Albaabka waxa lagu sameeyey loox.

23. Daaqadaha waxa ku jira muraayado.

24. Saqafka waxa lagu daboolay caws.

25. Hooyadu waxa ay xashiishka ku ridaysaa god.

26. Waxa ay ku ordeysaa guriga.

27. Gurigu waxa uu dadka ka celiyaa roobka.

28. Waxa uu ku nasanayaa barandaha.

29. Saynab waxa ay ku ciyaaraysaa qori-kabriid.

30. Cumar waxa uu ku ciyaarayaa mindi.

31. Cuntada waxa aynu ka helnaa tamar.

32. Cuntadu waxa ay jidhkeenna gelisaa caafimaad.

33. Hurdada waxa aynnu ka helnaa caafimaad.

12. Satsdelar (repetition)

Hitta subjekt, predikat, objekt, adverbial och satspartikel.

1. “Bax" waxaa tidhi hooyo.

2. Xasan wax baa uu akhrinayaa.

3. Xasan waxaa uu nadiifinayaa dariishadaha.

4. Aabbe waxaa uu tirinayaa lacag.

5. Aabbe wax baa uu cunayaa.

6. Faadumo wax baa ay akhrinaysaa.

7. Caasho waxa ay nadiifinaysaa dariishadda.

8. Hooyo waxa ay tirinaysaa lacag.

9. Hooyo wax baa ay cunaysaa.

10. Adigu ma arki kartaa?

11. Doolligu waxa uu ka boodayaa miiska.

12. Faadumo waa ay kacaysaa.

13. Xasan waxaa uu aadayaa dugsiga.

14. Isagu waxaa uu u socdaa dugsiga.

15. Saaxiibkii waxa uu leeyahay baaskiil.

16. Cali waa uu dhacay.

17. Baaskiilku waxa uu yaallaa dhulka.

18. Cali waxa la geeyay isbitaal.

19. Waxyaalahan ma yaalliin gurigiinna?

20. Goorma ayaa aad nadiifisaa gurigiinna?

21. Shalay roob ma di'in .

22. Qofna ha u sheegin .

23. Axmed gurigii ma uu aadin.

24. Kor ha u akhrin.

25. Halkee baa aad ku riddaa xashiishka?

26. Adigu ma nadiifisaa gurigiinna?

27. Maxaa ay carruurtu qabanayaan?

28. Maxaa ay dadku u dhaqdaan xoolahan?

29. Aan tijaabo samayno.

30. Maxaa aynnu u caawinnaa qoyskeenna?

31. Yaa tiriyey heesta?

32. Maxaa aynnu u daryeelnaa qoyskeenna?

33. Aan ciyaarno dhuumaalaysi.

34. Maxaa uu samaynayaa Xasan?

13. Satspartiklar

Hitta satspartikeln i varje mening. Ange också vilken funktion den har.

1. Arday waliba ha dhigo hal eray.

2. Waxyaalahan ma yaalliin gurigiinna?

3. Carruurtu ha kaa daba yidhaahdeen.

4. Goorma ayaa aad nadiifisaa gurigiinna?

5. Kani ma miis baa?

6. Shalay roob ma di'in.

7. Waraabayaashu waa ay weerari karaan carruurta.

8. Godka laydhku waxa uu leeyahay dab.

9. Qofna ha u sheegin.

10. Xasan wax baa uu akhriyayaa.

11. Xasan waxa uu nadiifinayaa daaqadaha.

12. Axmed gurigii ma uu aadin.

13. Jiirku ma ku hoos jiraa miiska?

14. Jiirku waxa uu ku nool yahay kaynta.

15. Kor ha u akhrin.

16. Adigu ma arki kartaa?

17. Arday ha yimaado fasalka hortiisa.

18. Halkee baa aad ku riddaa xashiishka?

19. Adigu ma nadiifisaa gurigiinna?

14. Satspartiklar

Ibland är satspartikeln sammandragen med ett annat ord och i vissa typer av satser finns ingen satspartikel. Förklara hur det förhåller sig i de följande meningarna.

1. Maxaa ay carruurtu qabanayaan?

2. Yaa ay siisay hooyo hilibkii?

3. Maxaa aad ku arki kartaa sawirka?

4. U sheeg carruurta in ay guuriyaan ereyga diin afar jeer.

5. Maxaa ay dadku u dhaqdaan xoolahan?

6. Aan tijaabo samayno.

7. Maxaa aynnu u caawinnaa qoyskeenna?

8. Magacow cuntooyinka hoos ku sawiran.

9. Yaa tiriyey heesta?

10. Maxaa aynnu u daryeelnaa qoyskeenna?

11. Aan ciyaarno dhuumaalaysi.

12. Maxaa uu samaynayaa Xasan?

13. Tixraac qalabyada hoos ku xusan.

15. Flera ord i samma satsdel

Raadi qaybaha weerta.
Had iyo jeer ka bilow QURUBKA.
Dabadeed raadi KHABARKA iyo YEELAHA.
Ugu dambayntii raadi LAYEELAHA iyo FALKAABKA.
Om det finns flera ord i samma satsdel, stryk då under huvudordet.

1. Qoyskooda ayaa cuni doona kalluunka shiilan.

2. Gidaarrada gurigan waxa lagu dhisay laamo.

3. Gurigu waa uu guban karaa.

4. Maxaa ay u adeegsadaan dhismaha guriga?

5. Soo booqda suuqa.

6. Eeg sawirkan guriga reer guuraaga.

7. Eeg qolkan fadhiga.

8. Maxaa ay labada nin samaynayaan?

9. Waxa aynnu xirannaa dhar kala duwan marar kala duwan.

10. Kooxda ugu fiican baa u jilaysa fasalka intiisa kale.

11. Sidee baa biyaha ugu kaydsataa guriga dhexdiisa?

12. Immisa qof baa qoyska Rooble ka kooban yahay.

13. Maxaa ka laallaada guriga agtiisa?

14. Gurigiinna ma waxa aad ku fariisataan kuraasi mise dermooyin?

15. Hore ma u aragtay guryahan oo kale?

16. Xubnaha qoysku waxa ay inagu baraan guriga walxo badan.

16. Sifo khabareed

Raadi qaybaha weerta.

Had iyo jeer ka bilow QURUBKA.

Dabadeed raadi KHABARKA iyo YEELAHA.

Ugu dambayntii raadi LAYEELAHA iyo FALKAABKA.

1. Adigu waa aad yar tahay.
2. Xididdadaasi badanaa waa ay waaweyn yihiin.
3. Waqtigee hadhkaagu ugu gaaban yahay?
4. Qoysku waxa uu ku nool yahay xeebta.
5. Dadka magaaladu waxa ay ku nool yihiin guryo kala duwan.
6. Iyagu waxa ay ku nool yihiin guryaha magaalada.
7. Kulligeen waxa aynu u baahan nahay nabad.
8. Kalluunsatadu waxa ay ku nool yiihin badda agteeda.
9. Adigu ma ku nooshahay guri magaalo?
10. Daaqaddu aad ayaa ay u yar tahay.
11. Hodan qoyskoodu waxa uu ku dhex nool yahay beer.
12. Hodan qoyskoodu waxa uu ku nool yahay beer dhexdeed.
13. Hurdadu waa ay inoo fiican tahay.
14. Idinku ma ku nooshihiin beer?

17. Magac-khabareedyada

Raadi qaybaha weerta.

Had iyo jeer ka bilow QURUBKA.

Dabadeed raadi KHABARKA iyo YEELAHA.

1. Basku waa hantidiisa.

2. Faarax waa beeraley.

3. Geeddi qoyskoodu waa reer-guuraa.

4. Kani waa Cumar.

5. Aamina waa Rooble walaashiis.

6. Dibeddu waa qorrax.

7. Iyadu waa xaaska beerqodaha.

8. Kani waa sawirka qoyska Geeddi.

9. Kani waa guri beeraley oo nadiif ah.

10. Dibida iyo irfidu waa hantidiisa.

11. Cismaan waa Hodan walaalkeed.

12. Kuwani waa Maxamed iyo Xasan.

18. Eray-madaxeedyada

Raadi qaybaha weerta. Had iyo jeer ka bilow QURUBKA.

Dabadeed raadi KHABARKA iyo YEELAHA.

Ugu dambayntii raadi LAYEELAHA iyo FALKAABKA.

Stryk under huvudordet och attributen i substantivfraser med flera ord.
Stryk under huvudverbet och hjälpverbet i verbfraser med flera verb.

I sammandragningar av två ord markerar du delarna med olika färger.

Sätt också en pil från prepositionerna till den fras som de syftar på.

1. Eeg sawirka sare.

2. Maxaa aad ku aragtaa?

3. Rooble gurigoodu waxa uu ku yaallaa magaalo.

4. Reer-guuraagu waxa uu dhaqdaa xoolo.

5. Dadka magaaladu waxa ay ku nool yihiin guryo kala duwan.

6. Xoolaha ayaa ay kolba meel ula guuraan.

7. Iyagu waxa ay ku nool yihiin guryaha magaalada.

8. Qoyskooda ayaa cuni doona kalluunka shiilan.

9. Badda ayaa uu kalluun ka soo dabanayaa.

10. Waxa uu aabbihiis u tolayaa shabakad kalluun.

11. Waxa ay kalluun ku iibinaysaa sariibadda.

12. Maxaa aad ku arki kartaa sawirka?

13. Waxa uu waraabinayaa geedo yaryar.

14. Axmed waxa uu caawinayaa hooyadiis.

15. Yaxaasku waxa uu ilkihiisa ku jejebin karaa lafaha dibi lugihiis.

16. Mid waxa uu ku nool yahay biyaha badda.

17. Nooca kale waxa uu ku nool yahay biyaha macaan.

18. Waxa uu hub ka dhigtaa sayntiisa.

19. Dad badan baa ku nool magaalooyinka.

19. Magac-khabareedyada

Raadi qaybaha weerta.
Had iyo jeer ka bilow QURUBKA.
Dabadeed raadi KHABARKA iyo YEELAHA.

1. Tani waa Maryan.

2. Maryan waa dawaarley.

3. Iyagu waa kalluumaysato.

4. Cali waa Saynab walaalkeed.

5. Kani waa sawirka Geeddi qoyskooda.

6. Geeddi qoyskoodu waa reer-guuraa.

7. Cismaan waa Hodan walaalkeed.

8. Kani waa Hodan qoyskoodii.

9. Waa immisa qof Hodan qoyskoodu?

20. Oraahyo adag

I de här meningarna finns komplexa fraser som innehåller en konjunntion. Markera alla konjunktioner.
Markera sedan alla satsdelar på vanligt sätt.

Aamina iyo Axmed waxa ay caawinayaan qoysaskooda.

Yaxaasku waxa uu leeyahay daaman iyo ilko adag.

Yaxaasku waxa uu ku nool yahay biyaha macaan ee labada webi ee Shabeelle iyo Jubba.

Indhihiisu waxa ay ku yaallaan dhakada sare ee madaxiisa.

Waxa uu sayntiisa ku legdi karaa ri’ ama qof.

Habartii sidaa ayey talo ku gaartay oo ku dhaqaaqday.

Digaagaddii ayey cunto iyo biyo badan siisay.

!! 21. Weero adag

Dela upp övningen i två delar, en med bisatsinledare, en med vanliga substantiv + relativ bisats. Markera substantivet med en ruta på samma sätt som bisatsinledarna för att tydliggöra likheten i strukturen. Flytta samordnade huvudsatser till en egen övning 20b.

1. Markera alla predikat och alla satspartiklar. Om det finns flera predikat så måste det också finnas flera satser.
2. Markera gränsen mellan satserna med ett tydligt tecken, t.ex. ◊
3. Markera alla konjunktioner och bisatsinledare.
4. Undersök varje sats och avgör om den är huvudsats eller bisats.

!! Kom ihåg att bara huvudsatser innehåller en satspartikel.
!! Kom ihåg att uppmaningar i imperativ saknar satspartikel, men ändå är huvudsats.

Maxaa dhacay ◊ markii uu tegey guriga? < maxay+baa
huvudsats ◊ bisats

Tus fasalkaaga sida loo adeegsado qalabkan.

Magacow qalabka ay dadku adeegsanayaan.

Magacow xoolaha aad ku dhex aragto sawirka.

U sheeg fasalka shaqada ay hooyadaa ka shaqeyso.

Qor magacyada xoolaha ay reer-guuraagu dhaqdaan.

Markii Xasan tegey dukaankii waxa uu ka helay Bilaal.

Maxaa aad adigu qabataa si aad u caawiso qoyskiinna?

Marka aad guriga ka shaqaynaysid ma qaaddaa heeso?

Ciyaartee baad jeceshahay in aad la ciyaartid saaxiibkaa?

Digaagaddii inta ay qodday god ayaa ay ku beertay galleydii.

Marka uu weynaado waxa uu gaari karaa dherer dhan 9 mitir.

Waxa ay ka baqeen in uu roob helo haddii ay garoonka tagaan.

Maanta in aynu kubbadda cagta ciyaarno aad bay u fiican tahay.

U sheeg fasalka sida ay kalluumaysatadu u soo dabato kalluunka.

Digaagaddii ayaa ka codsatay in ay saaxiibbadeed la beeraan galley.

Xasan iyo saaxiibkiis waxa ay jeclaayeen in ay ciyaaraan kubbadda cagta.

Haddii aynu garoonka tagno waxaa hubaal ah in uu roob nagu di'i doono.

Sahro waxa ay hadhuudh siinaysaa digaagga, ka dibna waxa ay tagtaa dugsiga.

Cismaan waxa uu waraabinayaa geedo yaryar, ka dibna waxa uu tagaa dugsiga.

Taasi waxa ay u fududaysaa in uu yaxaasku wax arko marka uu biyaha ku quuso.

Waxa uu ku jebin karaa sayntiisa geedka yar, waxa uuna ku legdi karaa ri’ ama qof.

Maxaa ay wiilashu jeclaayeen in ay sameeyaan marka ay dugsiga ka yimaadaan?

Duleedka tuulada waxa ku yaallay balli, waxaana ku wareegsanaa dad aad u badan.

Waqtiyada aadan joogin dugsiga mar-mar ma ciyaartaa ciyaarta kubbadda cagta?

Waxa ay bilaabeen in ay ku ciyaaraan bannaanka u dhow waddada baabuurta agteeda.

Yaxaasku waxa uu jecel yahay in uu u baxo webiyada, qaarkood iskuna diiriyo qorraxda kuleylkeeda.

Waxa aan isticmaalnaa astaamaha hadalka sida hakadyada in ay na tusaan erayada ay dadku yiraahdeen.

22. Relativa bisatser

Markera alla predikat och satspartiklar.
Markera < bisatsen > och det substantiv som bisatsen beskriver.
Bisatsen är attribut till substantivet. Stryk under attributet = bisatsen.

Waxaannu nahay arday < asluub wacan leh >

Sheekada ma ka garan kartaa meesha < uu Xasan tegayo > ?

Quraanjadu waxa ay cuntaa kaydkii ay meel dhigatay.

Ardaydu waxa ay riixeen baabuur dugsiga agtiisa ku damay.

Wax ka sheeg dhibaatooyinka aboorku leeyahay?

Waxa ay ayeeydeed ku noolayd guri ku yaal kaymaha dhexdooda.

Waxay aragtay tuke hilib afka ku haysta.

Ma arki karaa Jaamac lacagta ku jirta jeebkayga?

Maryan ma aysan arag daanyeerrada geedaha ku jira.

23. Inbäddade relativa bisatser

Ofta finns bisatsen i mitten av huvudsatsen. Då kan man säga att den är inbäddad i huvudsatsen.

Nin < ari la jooga > baa uu arkay.

Cali buuggii uu dugsiga ka amaahday buu keenay.

Baabuurka la riixay muxuu ahaa?

Dadka ka muuqda sawirkani waxa ay dhisayaan guryo magaalo.

I den sista meningen finns två relativa bisatser:

Nin sabool ah wuxuu arkay shabeel jidka yaal.

24. Relativa bisatser med kopula

Den korta verbformen *ah* 'som är' och ändelserna *-aa* / *-ayd* 'som var' av kopula-verbet *yahay* fungerar som predikat i relativa bisatser.

Ku buuxi shaqallada saxa ah.

Barre waxa uu wataa boorso buluug ah.

Gabar waliba waxa uu siiyay xabbad cambe ah.

Keen fasalka xoogaa khudaar ah.

Sawir nin beerfale ah.

Bisaddii yarayd waxa ay la kulantay xayawaanno badan.

25. Blandade relativa bisatser

Markera alla predikat och satspartiklar.
Markera < bisatsen > och det substantiv som bisatsen beskriver.

Fasalkan 2aad waxa aad ku baran doontaa sida < jidhka loo nadiifiyo >.

Dadka ka muuqda sawirku waxa ay dhisayaan guri beereed.

Qor shan wax oo aynnu dukaan ka soo iibsan karno.

Hooyadu waxa ay xashiishka ku ridaysaa god laga qoday bannaanka.

Magacow waxyaabaha aad ku aragto sawirka.

Sheeg waxa aad sawirkan ku aragtid.

Weligaa ma aragtay reer guuraa dhisaya guri?

Ma taqaannaa waxa ay ka samaysan yihiin?

Sawir kalluumayste ku dhex jira doonidiisa.

Shabeelku waxa uu ahaa mid dhintay.

Waxa aan dugsiga u qaataa jilbaab hurdi ah iyo cambuur buluug ah.

Madaxyadii hadhuudhka ahaa waa la tumay.

Maalin walba digaagaddaasi waxa ay dhali jirtay midh beed ah.

Ibraahim waxa uu ahaa nin gaboobey.

Macallinkii ayaa ardaydii uga sheekeeyey waxa uu Axmed sameeyey shalay.

Goorma ayaynu cunnaa wixii aynu kaydsannay.

Waxa yaalla qadiifad iyo fadhi lagu fariisto.

Waxyaabaha gidaarrada la suro iyo daahyadu waa ay qurxiyaan guriga.

Waxa jira walxo aynnu uga baahan nahay guriga.

26. Typer av bisatser

Markera alla predikat och satspartiklar.
Markera < bisatsen > och bisatsinledaren.
Är bisatsinledaren ett substantiv eller en konjunktion?
Vilken typ av bisats är det frågan om? Temporal, konditional, final etc.

Baabuurtu waa ay joogsadaan marka < uu nalku cas yahay >.

Tidsbisats (temporal bisats) weer-wakhtiyeed. Inleds med substantivet *marka*.

Maxaa aad isticmaashaa marka aad jidhkaaga maydhaysid?

Markuu tooso waa uu ku fikiraa.

Dhiiqu halkee buu joogey markii ay dawacadu u timid?

Maxaa dhacay intii uu ninku hurdey ?

Maxaa uu ogaaday ninku markii uu geedka kor u eegay?

Maxaa dhacay markii ay daayeeradu koofiyadihii ku soo qubeen ninka?

Ma jeceshahay in aad soo booqato ayeeyadaa?

Si ay u hesho ayey u raadisey hilibkii.

Waxa aan hubaa in codkaagu aad uga fiican yahay.

Maxaa ay dawacadii samaysay intii aysan tukaha hilibka ka qaadin?

Muxuu iibsadey markii uu haraggii gatay?

Maxaa dhacay markii uu ninkii arkay shabeelkii labaad?

Cabdulle ayaa gacan ku siiyey Xasan in uu dugsiga aado.

Waxa aan had iyo jeer ku bilownaa xaraf weyn marka aan qorayno maalmaha toddobaadka.

Xaawo waxa ay jeceshahay in ay ku ciyaarto ciidda.

Waxaana uu u sheegay in ay ku cunaan meel aan laga arki karin.

Markii aan qaato saaxiibkay lacagtiisa, Ilaahey ma i arkaa?

Maryan waxa ay doonaysaa in ay soo booqato ayeeydeed.

Markii ay dugsiga ka soo noqdaan Sahro waxa ay raacdaa ariga.

27. Typer av bisatser

Markera alla predikat och satspartiklar.
Markera < bisatsen > och bisatsinledaren.
Är bisatsinledaren ett substantiv eller en konjunktion?
Vilken typ av bisats är det frågan om? Temporal, konditional, final etc.

Rooble waxa uu adeegsadaa qorraxda si < uu u garto jihada >.

Final bisats som inleds med substantivet *si*.

Markii hadhuudhkii la tumay waa la kariyey.

Adeegso ereyadan weydiimaha si aad ugu buuxiso meelaha bannaan.

Waxa aan doonayaa in aan idiin sheego sheeko.

Haddii digaagaddan aan siin lahaa cunto iyo biyo badan waxa ay ii dhali lahayd beed fara badan.

Waxaa uu u sheegay in mid waliba uu keeno ul.

Ma jeceshahay in aad caawiso walaalahaa?

Digaagaddii inta ay qodday god ayaa ay ku beertay arabikhidii.

Kalluumaysatadu waxa ay adeegsadaan doonyaha iyo shebekedaha si ay kalluunka u soo dabtaan.

Waxaan toosaa qorraxdu inta aanay soo bixin.

Waxbarashadada dadka waaweyn markaad dhammayso maxaad qaban doontaa?

Markii gabadhii yarayd gaartey gurigii ayeeydeed waxa ay garaacday albaabkii.

Markii ay soo noqdeen waxa ay ku heshiiyeen in ay qaybsadaan idihii

Tukihii waxaa uu bilaabay in uu heeso.

28. Ordklasser – Allmänna frågor

1. Vad är ett ”morfem”?

2. Vad är en ”rot”?

3. Vad är ett ”prefix”?

4. Vad är ett ”suffix”?

5. Översätt de åtta ordklassernas namn till somaliska:

   substantiv, pronomen, adjektiv, verb, partiklar, konjunktioner, prepositioner, interjektioner.

6. Dela in följande ord i de olika ordklasserna:

   dayax, iyo, ka, akhriyaa, fiiri, sax, ay, ahayd, nin, ku, badan, i, oo, uu

7. Vad menas med att somaliskan är ett agglutinerande språk?

8. Vilka somaliska ordklasser innehåller ord som inte böjs?

9. Vilka är somaliskans fyra grundläggande prepositioner?

10. Ordet ’la’ har två helt olika betydelser. Ange de båda svenska betydelserna. Till viken ordklass hör vardera av de två betydelserna?

11. På vilken plats i satsen placeras de somaliska prepositionerna?

12. På vilket sätt uttrycker somaliskan motsvarigheten till andra svenskan prepositioner som t.ex. *framför, bakom, under*? Förklara och ge ett exempel.

29. Dela in ord i ordklasser

Till vilken ordklass hör varje ord i följande text? Några ord består av obligatoriska sammandragningar av två ord. De är markerade i texten.

Ange vilken ordklasser varje ord tillhör: substantiv, pronomen, adjektiv, verb, partikel, preposition, konjunktion eller interjektion.

Dalkeenna waxa ku nool diin badan. Waxa ay ku nool yihiin meelaha dhagaxa badan ee duurka dhexdiisa ah.

Diinku waxa uu leeyahay qolof adag. Marka uu diinku arko cadowgiisa waxa uu laabaa qoortiisa. Dabadeed waxa uu joojiyaa dhaqdhaqaaqa.

Waxa uu iska[1] dhigaa dhagax oo kale. Waxa uu filayaa in cadowgiisa uusan[2] arag.

Diinku waxa uu noolaan[3] karaa waqti dheer. Sida la yiri qaar ayaa waxa ay noloshoodu gaartaa 150 sano. Kuwaasina[4] aad bay u waaweyn yihiin.

Diinku waxa uu leeyahay lugo gaagaaban. Waxa uu u socdaa si aayar ah. Waxa uu cunaa caws badan.

Xilliga jiilaalka ah diinku waxa uu galaa geedaha hoostooda. Taas macnaheedu waxa ay tahay, diinku waxa uu hurdi karaa laba bilood.

Diinku inta badan ma sameeyaan wax dhaqdhaqaaq ah waxna[5] ma cunaan.

---

[1] is + ka

[2] uu + aan

[3] nool + ahaan

[4] kuwaasi + na

[5] wax + na

30. Ordklasser och morfem

Avgör för varje ord
– till vilken ordklass ordet hör,
– om ordet innehåller ett eller flera morfem,
– om morfemen är rot, prefix eller suffix.

Caqli Badane

Xasan waxa uu ahaa wiil aad u jecel mooska. Subax kasta waxa uu iskoolka u qaadan jiray moos. Maalin maalmaha ka mid ah isaga oo u socda iskoolka, oo moos gacanta ku sita ayaa daanyeer ka hor yimid. Daanyeerkii waxa uu damcay in uu mooska ka qaato Xasan. Markaas ayuu gadaal ka soo maray. Xasan waxa uu dareemay waxa gadaashiisa socda, waxa uuna fiiriyey gadaal. Daanyeerkii ayaa ku soo boodey oo Xasan ka dafay mooskii. Xasan aad ayuu uga xumaaday.

Maalintii labaad Xasan mooskii waxa uu gashaday boorsada, si uu mooska uga qariyo daanyeerka, hase ahaatee daanyeerkii waxa uu arkay mooskii oo ku jira boorsada, wuuna ku soo booday, waana ka dafay.

Xasan maalintii ku xigtay waxa uu ku fekerey sidii mooska uu uga ceshan lahaa daanyeerkii.

Maalintii saddexaad Xasan mooskii ayuu soo cunay, inta aanan guriga ka soo bixin, waxa uuna gancata ku soo qaatay qobkii mooska, waxa uuna ku fekerey in uu xal u helo dhibaatada haysata.

Daanyeerkii waxa uu ka dafay Xasan qobkii mooska, wuuna cunay. Xasan aad ayuu u xanaaqay markii uu arkay daanyeerkii oo cunaya qobkii mooska.

Maalintii afraad Xasan aad ayuu u fekerey, si uu u gaaro xal kama dambays ah. Subixii dambe Xasan inta uusan guriga ka soo bixin ayuu mooskii soo mariyey basbaas, wuuna soo qaatay. Daanyeerkii ayaa dafay

mooskii basbaaska lahaa, wuuna ku gubtay. Xasan aad ayuu ugu qoslay markii uu arkay daanyeerkii oo carabkiisu baannaanka yaallo oo boodboodaya, kana cararay mooskii.

Subaxii dambe Xasan waxa uu ku soo qaatay gacanta moos, waxa uuna soo ag maray daanyeerkii.

Daanyeerkii kama uu dafin Xasan mooskii maalin dambe.

Weydiimo

1. Xasan maxaa uu aad u jeclaa?

2. Markii uu iskoolka u socdey ee daanyeerku ka daba yimid maxaa uu gacanta ku haystey?

3. Xasan maxaa laga dafay?

4. Maalintii labaad xaggee ayuu mooska ku qarsaday?

5. Xasan maxaa uu daanyeerka ku sameeyey ugu dambayntii?

6. Maxaa ay tahay dulucda sheekadu?

Af Soomaali 1, Muqdisho 2018: 70–71